



Waxa la sameeyo haddii aad hesho ogaysiiska uga Yeerida Maxkamadda Laanta socdaalka (immigration)

(What to Do If You Get a Notice to Appear for Immigration Court)

Warqadan xogta aruursan ah waxa ay ka hadashaa waxa la sameeyo haddii aad ku hesho dukumiinti boostada la yiraa “Ogaysiiska uga yeerida” maxkamada laanta socdaalka. Waxaa soo dira Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security). Taa macnaheedu waa dowladdu waxa ay isku dayeysaa inay ku masaafuriso.

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah,
booqo: LawHelpMN.org



Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waa gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

Waxa uu kuu Sheegayo Ogaysiiska uga Yeerida Maxkamaddu

Waa maxay Ogaysiiska uga Yeeridu?

Ogaysiiska uga Yeerida Maxkamaddu ama NTA waa dukumiinti ay dhici karto inaad ka hesho Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security). Macnihiiwsuna waa in ay dowladdu isku dayeyso inay ku masaafuriso ayna **khasab tahay inaad maxkamad tagto**. Ogaysiiska u Yeeridu waxa uu yiraa in dowladdu ay qabto in lagu masaafuriyo. Wuxuu kaloo yiraa **taariikhda** iyo **goobta dacwo dhagaysigaaga ugu horeeyaa uu ka dhici**.

Haddii aan helo Ogaysiis u Yeerida, taa macnaheedu ma inaan leeyahay baa dhagaysi dacwo magangelyo?

May. Ogaysiiska uu Yeeridu kaliya macnihiiwsuna waa dowlad ayaa waxay isku dayeyso inay ku musaafuriso adiga.



- **Ma aha** macnaheedu in magangelyo ama wax kale oo nidaam nasteeexayn ahi uu kuu bilowday. Hadii aad rabto magangelyo ama noocyoo kale oo nasteeexeyn ah, waa khasab inaad cadsato.
- **Ma aha** macnaheedu inaad ogolaansho u haysato inaad ka shaqeyso United States. Hadii aad rabto inaad shaqeyso waa khasab inaad ogolaansho cadsato.

Sidee ayuu eg yahay Ogaysiiska U Yeeridu?

Waxaa ku jirta tusmo ah Ogaysiiska u Yeerida ah warqadan xogta aruursan ah. Ogaysiiska u Yeeridu waxa uu bixiyaa afar nooc oo akhbaar ah.

1. **Akhbaar adiga kugu saabsan.** Waxaa ku qornaan doona magacaaga, taariikhdaadda dhalashada, ciwaankaaga iyo lambarka telefanka. Wuxuu kaloo ku ooli Lambarkaaga-A ama Lambarka Diiwaangelinta Ajnabiga.” Lambarkani aad ayuu muhiim u yahay. Waad u baahnaan doontaa mar walba mudadda kiiskaaga laanta socdaalku (immigration) uu socdo. Ku xafid goob amaan ah.
2. **Sababta ay dowladdu u doonayso inay ku musaafuriso.** Waa uu sheegi doonaa qaybta sharciga ka mid ah ee dowladdu ay is leedahay waa aad jabisay.
3. **Goobta, taariikhda, iyo waqtiga dacwo qaadidaadda koowaad.**
4. **Saxiixa mas’uul ka tirsan Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security).** Qofka kuu soo diray Ogaysiiska u Yeerida ahi waa khasab inuu saxiixo uuna taariikhda ku qoro dukumiintiga.

In removal proceedings under section 240 of the Immigration and Nationality Act:

Subject ID: _____

FINS: _____

File No. _____

Lambarkaaga-A ama "Lambarka
Diiwaangelinta Ajnabiga"DOB: Taariikhdaada Dhalashada

Event No: _____

In the Matter of:

Respondent: Magacaaga oo buuxa

currently residing

at: Ciwaanka aad ku nooshahay iyo lambarka telefankaaga

(Number, street, city and ZIP code)

(Area code and phone number)

Hadii santuukha 1 ama 2 la calaamadiyo, dowladdu waxa ay leedahay wadanka U.S. waxaad
soo gashav fasax la'aan.

1. You are an arriving alien.
 2. You are an alien present in the United States who has not been admitted or paroled.
 3. You have been admitted to the United States, but are removable for the reasons stated below.

Haddii santuukha 3 la calaamadiyo, dowladdu waxay leedahay waxa aad ku soo gashay wadanka U.S. fasax,
laakiin hadda kuma ioogtid sharci halkan.

The Department of Homeland Security alleges that you:

Xaqaa'iqa kaa dhanka ah adiga ayaa halkan lagu soo qori. Waxaa dhici karta inuu yiraa ma aad tihid muwaadin Mareykan (United States) ah iyo wadanka aad ka soo jeedo. Wuxuu kaloo oran doontaa qaybta sharciga ka mid ah ee ay dowladdu leedahay waa aad jabisay.

- This notice is being issued after an asylum officer has found that the respondent has demonstrated a credible fear of persecution or torture.
 Section 235(b)(1) order was vacated pursuant to: 8CFR 208.30(f)(2) 8CFR 235.3(b)(5)(iv)

YOU ARE ORDERED to appear before an immigration judge of the United States Department of Justice at:

Ciwaanka maxkamadda aad u baahan tahay inaad u tagto dacwo dhagaysigaaga

(Complete Address of Immigration Court, including Room Number, if any)

on Taariikhda dacwo
dhagaysiga at Waqtiga dhagaysiga to show why you should not be removed from the United States based on the
(Date) (Time)

charge(s) set forth above.

4.

Saxiixa Mas'uulka Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of
Homeland Security) ee kuu oo diray Ogaysiiska u Yeerida ah

(Signature and Title of Issuing Officer)

Date: Taariikhda Ogaysiiska u
Yeerida la soo diray

Magaaladda iyo gobolka uu Mas'uulku ka shaqeeyo

(City and State)

See reverse for important information.

Form I-862 (Rev. 08/01/07)

Sharcigee ayey dowladdu ku andacoon kartaa (oran) waa aan jabiyey?

Tusaale ahaan: Mateo Ogaysiiskiisa u Yeerida ah Dowladdu waxaa laga yaabaa inay tiraan waxaa ku soo gashay United States sharci la'aan. **Tusaale ahaan, Mateo waxa uu si sharci-darro ah uga soo gudbay xuduudka Maksiko kuna soo galay United States.**



Santuukha #2 waa la calaamadiyey. "Waxaa tahay ajnabi ku sugan United States oo aan loo idmin ama loo saamixin."

Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security) waxa ay leedahay:

- Ma tahid muwaadin ama u dhashe United States.
- Waxaa tahay muwaadin maksikaan ah.
- Waa aad timi kana soo gashay United States El Paso, Texas, bishii Janaayo 8, 2024.
- Laguuma idmin laguumana saamixin ka dib fatashid uu sameeyey mas'uul ka socda laanta socdaalka (immigration) inaad wadanka soo gasho.

Tusaale ahaan: Hani Ogaysiiskeeda u Yeerida

Dowladdu waxaa laga yaabaa inay tiraan waxaad ku soo gashay United States si sharci ah (sidda fiise ku mealgaar ah) laakiin hadda si sharci ah kuma joogtid halkan. Dowladdu waxaa laga yaabaa inay tiraan fiisahaagi ku mealgaarka ahaa waa uu dhacay mana aadan dalban helid sharci deganaansho rasmi ah. Waxaa dhici karta inay yiraahdaan ma aadan raacin xeerarka si aad u haysato fiisahaaga ku mealgaarka ah. Ama waxaa dhici karta inay yiraahdaan waxa aad geysatay dambi taa macnaheedu waa ma aad sii haysan kartid fiisahaaga ku mealgaarka ah. Tusaalahan, Hani waxa ay ku soo gashay United States ka fiise arday, laakiin waxa ay noqotay inay ka tagto iskuulkii lix bilood ka dib kolkii ay bilowday. Iskuul dhigashadu waa mid ka mid ah shuruudaha sii hayshadeeda fiisaheeda ardayga.



Santuukha #3 ayaa la calaamadiyey. "Waxaa laguu ogolaaday soo gelid United States, laakiin waa lagaa saari karaa iyadoo la cuskanayo sababaha hoos ku xusan."

Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security) waxa ay sheegaysaa in:

- Aadan ahayn muwaadin ama u dhashe wadanka United States.
- Waxaa tahay muwaadin Soomaali ah.
- Waxaa lagu siiyey fiise arday bishii Luulyo 1, 2023.

- Waxaa lagaa siiyey ogolaansho ah inaad United States ka gelii karto Gegida Dayuuraha ee John F. Kennedy, ee Newyork – 4701 bishii Agoosto 15, 2023 on August 15, 2023.
- Iminka iskuul kama aad diiwaangashanid. Ma aadan fulin shuruudihii fiisahaaga ardaygu uu lahaa.

Waxa la sameeyo ka dib kolka aad Hesho Ogaysiiska U Yeerida

01



Eeg si aad u hubiso in taariikhda iyo waqtiga dacwo dhagaysigaagu uu sax yahay.

Telefanka ahaan. Wac khadka EOIR ka ee **1-800-898-7180**. Geli Lambarkaaga-A (A- Number) ama “Lambarka diiwaangelinta Ajnabiga.” (Gal barta immigrationhelp.org si aad u hesho Lambarkaaga-A.) Isticmaal taxaalka kala doorashadda waxyaabaha si aad u hubiso taariikhda iyo waqtiga dacwo qaadidaadda. Khadku telefanku waa Ingriiska iyo Isbaanish. Riix 2 si laguugu caawiyo Afka-Isbaanishka.

Khadka (Online). Gal barta acis.eoir.justice.gov. Geli Lambarkaaga-A (A-Number.) Eeg “akhbaarta Dacwo Qaadida Xigta” iyo “Akhbaarta La Soo Xiriirida Maxkamadda.”

Ogaysiiskaaga u Yeeridu waxaa dhici karta inuu ku jiro ama uusan soo gelin telefanka akhbaarta ee la waco ama la habka khadka markiiba. Haddii aad hesho Ogaysiis u Yeerid ah laakiin, telefanka ama khadka (online) uu yiraa ma lehid balan dacwo dhagaysi ah oo laguu qabtay, **raac tilmaamaha ku yaal ogaysiiska tagna dacwo dhagaysigaaga.** Eeg telefanka ama habka khadka (online) maalintii hal mar si aad uga eegto wixii soo cusboonaada.

02



Hubi in magacaaga, taariikhdaada dhalashada (TDH), iyo ciwaankaaguba ay sax yihiin.

- **Haddii ciwaankaaga ku qoran Ogaysiiska u Yeeridu uu khaldan yahay,** u soo sheeg ciwaankaaga cusub Maxkamadda Laanta Socdaalka (Immigration), hay'adda Laanta Socdaalka iyo Ilaalinta Kastanka ee U.S. [U.S. Immigration and Customs Enforcement (ICE)], iyo Wasaaradda Amniga Qaranka (Department of Homeland Security). Barta LawHelpMN waxaa ku jira xog aruursan si ay kaaga caawiso adiga inaad soo sheegto isbedelka ciwaanka. Gal barta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/reporting-change-address-immigration-court
- **Haddii aad u guurtay gobol kale aadna doonayso inaad u wareejiso dacwadaadda laanta socdaalka maxkamad kale,** xareyso codsi si aad u bedesho goobta maxkamadda. Barta LawHelpMN waxaa ku jira xog aruursan si ay kaaga caawiso adiga inaad bedesho goobta maxkamadaaddu ka dhici. Gal barta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/how-move-your-immigration-hearing-different-court-change-your-venue
- **Haddii magacaaga ama taariikhdaadda dhalashadu (TDH) ay khaldan tahay,** u sheeg xaakimka waqtiga ugu horeeya ee dacwo qaadidaadda.

03



La tasho qareen haddii aad awodo.

Dowaladdu waxaa dhici karta inay la soo dirto liis ay ku qoran yihiin qareemo bilaash ku shaqeyya Ogaysiiskaaga u Yeerida. Waa aad wici kartaa iyaga. Waxaa kale oo aad ka baari kartaa qareemo bilaash ah barta LawHelpMN.org.

Qareemada lacag la'aanta ah aad ayaa doonaa. Lagaama balan qaadi karo qareen lacag la'aan ah in laguugu helo codsigaaga awgii uun. Siddoo kale waa aad qabsan kartaa mid iskii u shaqeysta haddii aad awodo inaad iska bixiso kharashkiisa. Haddii aad la kulanto qareen, waxa uu dooni **qareenkaasi inuu arko Ogaysiiska u Yeerida**.

Hadii aadan haysan qareen, wali waxa aad u baahan tahay inaad tagto dacwo qaadidaadda hore. Adiga ayaa isu hadli kara haddii aadan heli karin qareen ku caawiya.

04

Ka samee nuqulo.

Ogaysiiskaaga u Yeeridu waa dukumiinto muhiim ah. Ka samee nuqulo ama sawir uga qaad telefankaaga. Kuna xafid meel amaan ah.



05

U soo qaado dacwo qaadidaadda hore.

Xaakimku waxa uu ku waydiin doonaa inaad heshay Ogaysiiska u Yeerida ah. Waa ay ku caawin kartaa kolkaa inaad wadato isaga. Gal barta lawhelpmn.org ama mari kooda QR ka warqadda xogta aruursan si aad u ogaato waxa aad fili karto inaad la kulanto marka ugu horeeysa ee aad tagto maxkamadda laanta socdaalka.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsii ah waa mid si adag loo mamnuucay.